# <h1>Wixii ku saabsan miisaaniyaddaada gaarka ah

<p1>Warbixintan adiga ayaa laguugu talagalay haddii adiga ama qof qoyskaaga ka mid ahi aad taageero ka heshaan Adeegyada Bulshada (Social Services), ama laga yaabo in aad taageeradaas u baahataan mustaqbalka.

<p2>Dadka naafaysan, qaba cudur muddadiisu badan tahay ama tabar daran, waxay badi u baahdaan in laga taageero nolol maalmeedkooda, si ay xornimadooda u haysan karaan. Dad badan ayaa taageeradaas qayb ka mid ah ka heli kara Adeegyada Bulshada. Adeegyada Bulshada waxay qayb ka yihiin kawnsalka xaafaddaada, waxaana weliba loogu yeedhi karaa Adeegyada Beesha (Community Services) ama Adeegyada Daryeelka Bulshada (Social Care Services).

<p3>Halka aad ku nooshahay, waxaad taageeradaas ku heli kartaa adigoo isticmaalaya ‘miisaaniyad gaar ah’ (individual budget). Lahaanshaha miisaaniyadda gaarka ahi waxay kuu fasaxi kartaa in aad adigu xukunto taageerada aad helayso, waxaanad sidaas ku heli kartaa taageerada runtii adiga kuu waxtar fiican.

<p4>Adeegyada bulshada ayaa, Baaris ka dib, kuu sheegi doona cadadka lacagta u diyaar ah in lagu bixiyo taageerada aad u baahan tahay. Taasi waa ‘miisaaniyaddaada gaarka ah’. Waxaad markaas sheegi kartaa nooca taageerada aad rabto in aad lacagta ku iibsato. Waxaa weli jiri doona dad taas samaynteeda kaa taageeri kara. Waannu kuu sii sharxi doonnaa sida ay taasi u dhici doonto. Maamulahaaga daryeelka (care manager) ee ka socda Adeegyada Bulshada ama Ururkaaga Caafimaadka Maskaxda (Mental Health Trust) ayaa iyaguna awoodi doona in ay taas warbixin dheeraad ah kaa siiyaan.

## <h2>Baarista - soo ogaanshaha cadadka lacagta u diyaar ah taageerada aad u baahan tahay

<p5>Si loo soo ogaado cadadka lacagta u diyaar ah taageerada aad u baahan tahay, waxaad u baahan doontaa in aad su’aalo ka jawaabto. Waxaa wax lagaa weydiin doonaa waxyaabaha aad u baahan tahay in lagaa taageero, iyo inta ay le’eg tahay taageerada aad u baahan tahay. Waxaa macluumaadkaas loo adeegsan doonaa si go’aan looga gaaro cadadka lacagta lagu siin karo, iyo waxyaabaha lacagtaas lagu bixin karo. Waxaa lacagtaas loo yaqaannaa miisaaniyaddaada gaarka ah.

<p6>Waxaa jira lacago noocyo kala duwan ah oo dawladda ka yimaadda oo geli kara miisaaniyaddaada gaarka ah. Qaar waxaa loogu talagalay in lagu bixiyo qalabka iyo beddelaadda aqalkaaga si aad u geli karto una isticmaali karto. Qaarna waxaa loogu talagalay in aad ku daboosho baahiyahaaga nolol maalmeedka, sida mayrashada iyo labisashada iyo u bixitaanka dukaannada. Waxaa weliba jirta lacag aad ku haysanayso shaqadaada. Maamulahaaga dareeylka ayaa kuu sharxi doona noocyada lacagta aad gelin karto miisaaniyaddaada gaarka ah.

**<h3>Qorshaynta taageerada aad u baahan tahay**

<p7>Iminka oo aad og tahay cadadka lacagta kuu diyaar ah, waxaad u baahan tahay in aad u qorshaysato in aad sheegto sida aad taas u kharash gelin doonto. Haddii aad rabto, waa lagaa taageeri karaa qorista qorshaha. Tani waa qaybta ugu muhiimsan ee samaysashada miisaaniyadda gaarka ah – waa marka aad fursad u helaysid in aad sheegto sida aad rabto in ay noloshaadu noqoto, iyo in aad keento fikradaha aad taas ku gaarayso. Waxaad taas taageero ka weydiisan kartaa qoyskaaga ama saaxiibbadaada, maamulahaaga daryeelka ayaana kuu sheegi kara dadka kale ee ku taageeri kara.

<p8>Waxaa jira siyaabo kala duwan oo loo qori karo qorshaha. Maamulahaaga daryeelka ayaa wax kaaga sheegi kara siyaabahaas qaarkood. Dadka qaarkood waxay fadhiistaan miiskooda jikada wayna wadahadlaan waxayna qoraan waxa ay rabaan in ay qorshaha geliyaan. Dad kalena waxay la shaqeeyaan kooxo dad kale oo iyaguna qoraya qorshahooda, wayna wada shaqeeyaan si ay fikirkooda iskaga caawiyaan. Dadka qaarkood waxay isticmaalaan masaawiir iyo sawirro xarriiqan si ay kuwaasi iyaga uga caawiyaan in ay xusuus qor ka samaystaan waxa ay rabaan in ay sheegaan. Waxaad qorshaha u qori kartaa iskaa, ama waxaad gargaar weydiisan kartaa qof ka socda adeegyada bulshada ama urur kale.

<p9>Marka aad qorayso qorshaha waxaa ugu fiican in aad ka fikirto waxa runtii muhiim kuu ah adiga noloshaada. Waxay taasi kaa caawin doontaa in aad soo ogaato taageerada sida ugu fiican u waxtari doonta noloshaada.

<p10>Waxuu qorshuhu u baahan doonaa in uu sheego waxa aad rabto in aad ka beddesho noloshaada. Waxaa taas ka mid noqon kara beddelaadda halka aad ku nooshahay, beddelaadda adeegyada aad hesho, ama beddelaadda sida aad waqtigaaga isku dhaafiso. Ama waxaabay ku saabsanaan kartaa oo keliya beddelaadda adeegyada aad hesho si aad u haysato waxa adiga kuu muhiim ah noloshaada.

<p11>Waa in uu qorshuhu sheego nooca taageerada aad u isticmaali doonto si aad noloshaada uga gaarto isbeddellada aad rabto. Waa in uu sheego sida aad u sugi doonto nabaddaada iyo wanaaggaaga.

<p12>Waa in uu qorshuhu qeexo sida aad rabto in loo isticmaalo miisaaniyaddaada gaarka ah. Waa in uu sheego qiimaha waxyaabaha la soo iibin doono.

<p13>Waxaa jira siyaabo kala duwan oo aad u qaadan karto lacagta ku jirta miisaaniyaddaada gaarka ah. Waxaad ku haysan kartaa akown bangi oo kuu gaar ah waxaanad iskaa ugu bixin kartaa waxyaabaha qorshahaaga kuugu jira. Waxaa taas loo yaqaannaa bixinta tooska ah. Urur ama qof kale ayaad weydiisan kartaa in uu lacagta kuu hayo oo uu waxyaabaha kuu soo iibiyo. Ama waxaad lacagta ku bixin kartaa waxyaabo uu kawnsalku soo iibin karo ama uu isagu bixiyo si aadan markaas uba arag lacagta.

<p14>Waa in uu qorshuhu sharxo sida loo habayn doono wixii taageero ah ee aad lacag ka bixiso. Tusaale ahaan, haddii aad yeelan doonto shaqaale ku taageera, waxaad markaas u baahan doontaa in aad ogaato sida aad u qabsan doonto shaqaalaha, sida mushahar iyaga loo siin doono, iyo sida loo tababbari doono loona kormeeri doono. Taas adiga ayaa samayn kara, ama urur kale ayaad weydiisan kartaa in uu taas kuu sameeyo.

<p15>Waa in uu qorshuhu sheego sida aad u haysan doonto maamulka noloshaada. Waxay taasi ka dhigan tahay in aad ka fikirto go'aannada aad gaari doonto. Marka ay dad kale go'aannada kuu gaarayaan, waa in ay caddaato sida aad uga qaybgalayso waana in ay rukhsaddaada helaan.

<p16>Ugu dambayntii, waa in uu qorshuhu sheego waxa adiga iyo dadka kale aad samayn doontaan si aad u hubisaan in uu qorshuhu hirgalo. Waa in uu qorshuhu qeexo waxyaabo dhab ah oo dhici doona mustaqbalka. Sidaas ayay ku suurtogeli doontaa in aad dib ugu noqotaan oo aad u fiirisaan in uu qorshuhu waxtarayo iyo in kale.

<h4>**Oggolaanshaha qorshaha**

<p17>Ka dib marka aad qorshahaaga qorto, Adeegyada Bulshada ayaa kuu sheegi doona in la oggolaaday iyo in kale. Haddii ayan u malaynayn in uu qorshahaagu kuu ilaalin doono caafimaadka, nabadda iyo wanaagga, waxay markaas ku weydiisan karaan in aad beddesho. Haddii aadan u malaynayn in ay jirto lacag ku filan sidii aad u ilaalin lahayd caafimaadkaaga nabaddaada iyo wanaaggaaga, waxaad markaas u baahan doontaa in aad taas iyaga kala hadasho.

<p18>Kuwan soo socda ayaa tusaale u ah siyaabaha dadka kale ee jooga waddanka qaybihiisa kale ay u kharash geliyeen miisaaniyadahooga gaarka ah:

<p19>Xaawo Cali waa la qabaa waxayna leedahay wiil 11 jir ah. Way naafaysan tahay waxayna leedahay kaaliye iyada taageera. Aad ayay ugu faraxsanayd kaaliyaha. Kaaliyaheeda ayay ku sii haysatay miisaaniyaddeeda gaarka ah, laakiinse waxay weliba kaydsatay xoogaa lacag ah maadaama ay ninkeeda weydiisatay in uu mararka qaar ka taageero kicitaanka halkuu ka caawin lahaa kaaliyaheedu. Lacagta ay kaydsatay waxay ku iibsatay qalab hawo qaboojis oo ay dhigtay qol ka mid ah aqalkeeda. Waxay taasi ka caawisay neefsashadeeda markii uu dhulku kululaaday, sidaasna waxaa kaga yaraaday tagitaanka isbitaalka – taasoo welibana u fiicnayd wiilkeeda iyo ninkeeda. Waxay weliba lacagta qayb ku samaysatay sagxado janjeera oo fudud si aqalkeeda loogu geli karo gaariga curyaanka.

<p20>Mudane iyo Marwo Cilmi way wada nool yihiin waxayna gargaar ka helaan gabadhooda Amina. Marwo Cilmi waxay qabtaa dhibaatooyinka jirka ka haysta iyo weliba lumitaanka xusuusta dhow. Mudane Cilmi wuu indha la' yahay waxuuna qabaa lumitaanka xusuusta dhow. Waxuu xaaskiisa ka caawiyaa hawlo fara badan oo nolol maalmeedka ka mid ah.

<p21>Waxay taageero ka heli jireen shaqaale hay’ad ka socda laakiinse waxaa ku adkaatay in ay wax qorshaystaan maadaama ay shaqaaluhu maalin walba waqtiyo duwan iman jireen. Marwo Cilmi waxay tagtay hoy daryeel oo la dego si ay ninkeeda nafis u siiso laakiinse halkaasi ma ay cajabin iyada.

<p22>Waxay isticmaaleen miisaaniyaddooda gaarka ah si ay hay’adda uga keentaan shaqaale, laakiinse waxay markan gacan dheeraad ah ku lahaayeen cidda imanaysay, iyo waqtiga ay imanayeen. Halkay hoyga daryeelka ee la dego uga dhiganayeen nafis, waxay tageen hudheel yar oo ku yaalla Bournemouth, taasoo iyaga u ahayd xasuus fiican. Nafis ayay sidaas labadooduba ku heleen, waxayna lacag siiyeen hay’ad daryeel oo ku taalla Bournemouth si ay taasi Marwo Cilmi uga taageerto daryeelkeeda shakhsi ahaaneed. Waxay Marwo Cilmi weliba tagaysay xarunta maalmeed ee xaafadda ee uu kawnsalku waday, maalin toddobaadkii.

<p23>Siciid waa nin dhallinyaro ah oo la nool qoyskiisa. Waxuu qabaa naafonimada waxbarashada iyo cudurka maskaxda gaara ee autism la yiraahdo waxuuna dugsiga u tagi jiray meel aad u fog taasoo uusan jeclayn. Markuu guriga joogay waxaa jiray shaqaale badan oo kala duwan oo guriga iman jiray si ay u kiciyaan una kexeeyaan – ma uusan jeclayn in ay dad badani ku jiraan noloshiisa, qoyskiisuna ma ayan jeclayn in ay aqalkooda ka buuxaan dad shiisheeye oo kala wareegayey. Qoyskiisu badi kama ay seexan jirin maadaama uu gidaarrada qolkiisa garaaci jiray sababtoo ah hurdo xumada haysatay. Siciid ma hadlo markaa qoyskiisa ayaa isaga la qorsheeyey sidii loo kharash gelin lahaa miisaaniyadda gaarka ah iyagoo isticmaalayey dhammaan wixii ay isaga ka yaqaanneen. Waxuu iminka tagaa kulliyad xaafadda ku taalla waxuuna leeyahay koox yar oo shaqaale oo ka socota beesha xaafaddiisa. Waxay qoysku la heshiiyeen xarunta jimicsiga ee xaafadda si uu shaqaalihiisu ugu geli karo bilaash isagoo isticmaalaya xubinnimadiisa, waxuuna tagaa maalin kaste – waxuu isku daaliyaa dhammaan mashiinnada jirka lagu dhiso ee xarunta jimicsiga iminkana qof walbaaba si fiican ayuu habeenkii u seexdaa.

<p24> Axmad waa nin dhowr iyo 30 jir ah oo muddo badan isticmaalay adeegyada caafimaadka maskaxda. Waxyaabaha isaga wanaaggiisa gacan ka geysta waxa weeyaan nasashada, ilaalinta xiriirka uu la leeyahay saaxiibbadiisa iyo samaysashada saaxiibbo cusub, iyo naqshadaynta Waxuu xoogaa naqshadayn ah ku samayn kari lahaa xarunta maalmeed, laakiinse wuu necbaa joogitaanka meeshaas. Waxaa jiray hoy la dego oo uu tagi kari lahaa, si uu ugu nasto, laakiinse ma uusan jeclayn. Waxuu miisaaniyaddiisii yarayd ku baxshay naqshado si uu guriga naqshadayn ugu sameeyo, ujrooyinka rukunashada ee urur uu ku biiray si uu u barto dad cusub. Waxuu miisaaniyaddiisa qaybteed ku baxshay fasax uu saaxiibbadiisa u raacay waxuuna xoogaa kale ku baxshay casharrada wadista baabuurka.